Tallaalada COVID-19: FAQ-yada Dooska Labaad ee Xoojiyaha

Dukumeentigan waxaa ku jira macluumaadka qiyaasta/dooska tallaalka ee COVID-19 iyo talooyinka kuwa u qalma inay helaan qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah. Haddii aadan weli dhammaystirin tallaalka COVID-19 ee taxanaha aasaasiga ah iyo/ama aad heshay qiyaastaadii koowaad ee tallaalka xoojiyaha ah, markaa wakhti xaadirkan uma qalantid inaad hesho qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah.

Goorma ayuu qiyaasta/dooska labaad ee tallaalka xoojiyaha ah la heli karaa?

Markay ahayd Maarso 29, 2022, Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (Food and Drug Administration, FDA) ee mareykanka ayaa u oggolaaday qiyaastooda labaad ee tallaalka xoojiyaha ah ee tallaalada Pfizer-BioNTech ama Moderna COVID-19 dadka da'doodu tahay 50 sano ama ka weyn iyo shakhsiyaadka difaaca jirkooda uu liito qaarkood (kuwa nidaamka difaaca jirkoodu uu daciifka ah). Iyadoo la raacayo oggolaanshaha FDA, Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (Centers for Disease Control and Prevention, CDC) waxay cusboonaysiiyeen talooyinkooda ku aadan tallaalka COVID-19 si ay ugu oggolaadaan shakhsiyaadka difaac jirkoodu uu liito qaarkood iyo dadka da'doodu ka weyn tahay 50 sano jir ee helay qiyaasta tallaalka xoojiyaha ee bilowga ahaa ugu yaraan afar bilood ka hor si ay ugu qalmaan tallaal kale oo xoojiye mRNA ah(ama qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha). Intaa waxaa dheer, CDC waxay ballaarisay talooyinkooda ku aadan qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah ee mRNA-ga si ay sidoo kale ugu soo daraan dadka waaweyn ee helay labada qiyaas ee tallaalada aasaasiga iyo xoojiyaha ah ee tallaalka Johnson & Johnson ee COVID-19 ugu yaraan afar bilood ka hor.

Yaa u qalma qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah?

Hadda, waxa jira saddex qeyb oo ka mid ah dadwaynaha oo u qalma inay helaan qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiha ah oo ah tallaalka COVID-19. Dadweynahani waxaa ka mid ah dadka laga yaabo inay halis dheeraad ah ugu jiraan jirro daran, in isbitaal la dhigo iyo dhimasho ay sabab u tahay infekshonka COVID-19. Sida laga soo xigtay FDA, Caddaynta hadda jirta waxay soo jeedinaysaa xoogaa ilaalin ah oo sii yaraanaya muddo ka dib oo ku aadan natiijooyinka halista ah ee ka imanaya COVID-19 ee dadka da'da ah iyo kuwa difaaca jirkoodu uu liito. Dadku waxay u baahan yihiin inay tixgeliyaan da'dooda iyo xaaladdooda caafimaad markay dooranayaan inay qaataan iyo in kale qiyaasta dheeraadka ee tallaalka xoojiyaha ah. Dadka reer North Dakota waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la hadlaan dhakhtarkooda ama bixiyaha daryeelka caafimaad ee la aamini karo si ay u hubiyaan inay iyagu go'aanka ugu fiican qaadanayaan.

1. Dhammaan dadka waaweyn ee da'doodu tahay 50 sano iyo wixii ka weyn

Dhammaan dadka waaweyn ee da'doodu tahay 50 ama ka weyn waxay u qalmaan inay helaan qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah ee tallaalka mRNA (Pfizer ama Moderna) COVID-19 ugu yaraan afar bilood ka dib qiyaasta tallaalka xoojiyaha koowaad ee tallaal kasta oo la ansaxiyay ama la oggolaaday ee COVID-19.

2. Dhammaan dadka da'doodu tahay 12 sano iyo wixii ka weyn ee difaaca jirkoodu uu liito

Dhammaan dadka da'doodu tahay 12 ama wixii ka weyn kuwaas oo si dhexdhexaad ah ama si aad u daran uu difaaca jirkoodu liito u qalmaan qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah ee tallaalka mRNA (Pfizer ama Moderna) COVID-19 ugu yaraan afar bilood ka dib markii ay qaateen qiyaasta tallaalka xoojiyaha ee kowaad. Waqti xaadirkan, dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 12-17 sano ayaa kaliya loo oggolaaday inay helaan tallaalka Pfizer COVID-19 dhammaan qiyaasaha oo ay ku jiraan taxanehooda aasaasiga ah, dooska dheeraadka ah iyo qiyaasaha xoojiha ah. Haddii aad si dhexdhexaad ama aad u daran uu u liito difaaca jirkaaga oo aanad weli helin qiyaas dheeraad ah, waa inaad sidaas sameysaa ka hor intaadan codsan qiyaasta xoojiyaha ah. Fadlan la xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga haddii aad qabto su'aalo ku saabsan haddii xaaladdaada caafimaad ay sababi karto inaad u qalanto ka bukaan ahaan oo si dhexdhexaad ah ama aad u daran uu u liito difaaca jirkiisa.

La Cusboonaysiiyay 3/31/2022

NORTH Dakota | Health
Be Legendary.™

3. Dhammaan dadka waaweyn ee 18-49 jir ah ee helay laba qiyaasood oo ah tallaalka Johnson & Johnson ee COVID-19

Dhammaan dadka waaweyn ee 18-49 jir ah ee helay tallaalka Johnson & Johnson COVID-19 labadoodii qiyaas ee aasaasiga ahayd iyo qiyaasta xoojiyaha ee koobaad ugu yaraan afar bilood ka hor waxay hadda u qalmaan inay helaan qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah ee tallaalka mRNA(Pfizer ama Moderna) ee COVID- 19. Hagitaankan KUMA uusan soo darin dadka waaweyn ee helay tallaalka Johnson & Johnson COVID-19 ee taxanahoodii aasaasiga ahaa laakiin ka dibna helay qiyaasta tallaalka xoojiyaha ah ee tallaalka mRNA (Pfizer ama Moderna) ee COVID-19.

Waa maxay sababta aan ugu baahanahay qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah?

Waxaa jira dhowr sababood oo aad u rabto inaad tixgaliso helida qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha haddii aad u qalanto. Go'aankaagu wuxuu ku xirnaan doonaa heerkaaga shakhsi ahaaneed ee khatarta la xiriirta infekshonka COVID-19, oo ay ku jiraan haddii aad halis dheeraad ah ugu jirto jirro daran, isbitaal dhigid iyo dhimasho, iyo sidoo kale da'daada iyo markaad heshay qiyaastaadii kuugu dambeysay ee talllaalka COVID-19.

Tallaalka xoojiyaha ee labaad ayaa laga yaabaa inuu hoos u dhigo khatartaada inaad u dhimato COVID-19 dartiis. Xogta ka timid Israa'iil waxay muujinaysaa qiyaasta xoojiyaha(labaad) ee dheeraadka ah inuu ammaan yahay uuna badbaadin karo naf. Dhimashada ay sabab u tahay kala duwanaanshaha omicron ee xogtan ayaa si aad ah hoos ugu dhacday - 78% hoos u dhac - da'daas 60 iyo ka weyn ee Israa'iil ee helay qiyaasta xoojinta labaad.

Halistaada ku aadan jirrada daran ee COVID-19 ayaa la kororta da'da.
Inta aad da'a ahaan weyn tahay, ayeey faa'iido ahaan weyntahay waxa laga yaabo iney kuu keento qiyaasta labaad ee xoojiyaha, sababtoo ah ilaalinta ay bixiyaan tallaalada xoojiyaha ah ayaa sii yaraada muddo ka dib. Inta lagu jiro aafada, dadka waaweyn ee da'da ah waxay aad ugu dhow yihiin inay si xun ugu bukoodaan COVID-19. Dadka waaweyn ee qaba COVID-19 waxay halis dheeraad ah ugu jiraan inay u baahdaan isbitaal dhigis, ku qaabilida qeybta daryeelka degdega ah ama hawo-mareen ka caawiya inay neefsadaan. Intaa waxaa sii dheer, dadka waaweyni waxay leeyihiin 25x-340x oo ah khatar weyn oo sababeysa u dhimashadooda, iyadoo ku xiran da'dooda, laga bilaabo COVID-19 marka loo eego shaqsiyaadka da'doodu u dhaxayso 18-29 sano. Dadka waaweyn iyo shakhsiyaadka ku nool xarumaha daryeelka muddada-dheer (sida guryaha loogu tala galay ku noolansha iyo kalkaalinta xirfadeysan) waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la hadlaan daryeelkooda caafimaad si ay u helaan qiyaas labaad oo tallaalka xoojiyaha ah.

Waxtarka tallaalka ka dib xoojiyahaaga koowaad ayaa laga yaabaa inuu bilaabo inuu sii yaraado muddo ka dib.
Waxtarka tallaalka ee tallaalka COVID-19 ayaa la muujiyay inuu hoos u sii dhaco muddo ka dib. Sidaa darteed, saraakiisha caafimaadka dadweynaha iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadku waxay si adag ugu talinayaan muhimadda ay leedahay in aad la socoto tallaaladaada iyo qaadashada qiyaasaha tallaalka xoojiyaha ah markaad u qalanto. Inta lagu jiro heerka ugu sarreeya ee mawjadda omicron, dadka waaweyn waxay ahaayeen kuwo ay 94% ka yar yihiin in lagu xiro neef-siiyaha/hawo-mareenka ama ay u dhintaan COVID-19 ka dib markey helaan saddex tallaal (ama ka dib qaadashada qiyaastoodii ugu horraysay ee tallaalka xoojiyaha) marka la barbardhigo kuwa helay laba tallaal oo keliya. Si kastaba ha ahaatee, heerkan la arkay ee ilaalinta waxa laga yaabaa inuu bilaabo inuu hoos u dhaco wakhti ka dib.

Falanqaynta CDC ee dhowaan ayaa tusinaysa caddaynta hoos usii dhicida difaaca jirka muddo kadib kana soo horjeeda booqashooyinka qolalka xaaladaha deddega ah ee COVID-19 iyo booqashooyinka dadka isbitaalka la dhigay inta lagu jiro xilliga omicron-sare lagu jiro. Laba bilood ka dib qiyaasta saddexaad (ama qiyaastii koowaad ee tallaalka xoojiyaha ah), dadka ayaa 91% laga ilaaliyay isbitaal dhigista. Afar bilood ka dib qiyaastaas, ilaalintu waxay hoos ugu dhacday ilaa 78%. Nasiib wanaag, daraasad lagu sameeyay gudaha Israa'iil ayaa lagu ogaaday in qaatayaasha labada tallaal ee Pfizer ama Moderna ee COVID-19 ay lahaayen kor u kac~9-10-laablaabid IgG ah iyo dhexdhexaadinta waxyaabaha ku jiraan milanka gudaha laba toddobaadyo kadib tallaalka labaad ee xoojiyaha ah, dib ugu soo celinta waxyaabaha ku jiraan milanka kuwii la qiyaasay ka dib qiyaasta tallaalka saddexaad. Markaa, qiyaas xoojiye dheeraad ah ayaa bixin kara ilaalin dheeraad ah.

Miyeey qiyaasaha labaad ee xoojiyayaasha ammaan yihiin?

Xogtu waxay soo jeedinaysaa in qiyaasta labaad ee xoojiyaha tallaalka mRNA COVID-19 uu wanaajinaayo ka hortagga COVID-19 ka ba'an oo uuna la xiriirin wax walaacyo cusub oo ku saabsan badbaadada. FDA waxay go'aamisay faa'iidooyinka la yaqaan iyo kuwa suurtagalka ah ee qiyaasta labaad ee tallaalka COVID-19 oo mid ka mid ah tallaaladan ay ka miisaan badan yihiin khatartooda la yaqaan iyo kuwa suurtagalka ah ee ay ku yeelanayaan dadkan.

Miyaan u baahanahay qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah haddii uu horay iigu dhacay infekshonka COVID-19?

Dadka reer North Dakota waxaa lagu dhiirigelinayaa inay wada hadal la yeeshan bixiyaha daryeelka caafimaad ee la aamini waxa kusaabsan haddii aad qaadanayso qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah iyo in kale. Iyada oo ku xiran da'daada, xaaladdaada caafimaad, markii aad qaaday infekshonkaagii hore iyo nooca COVID-19 ee aad u badan tahay inaad qaaday, bixiyaha daryeelka caafimaadkaagu waxaa laga yaabo in uu go'aamiyo iney ugu wanaagsan in dib loo dhigo qaadashada labaad ee tallaalka xoojiyaha ah.

CDC waxay ku talinaysaa in dadka la tallaalo xitaa haddii hore looga helay COVID-19. Dadka reer North Dakota ee laga helay COVID-19 ka dib Janaayo 1-deedii waxay u badan tahay inay qaadeen noocyada Omicron waxayna dooran karaan inay dib u dhigaan tallaalka laba ilaa afar bilood ka hor intaysan helin qiyaasta 2aad ee tallaalka xoojiyaha ah. Cadeyn soo baxaysa ayaa soo jeedinaysaa in ka hortagga ugu fiican ee jirada COVID-19 uu yahay difaac jireed isku-dhafan, oo leh labaduba tallaal iyo ka hor infekshonka. Way fiican tahay in la is tallaalo ka hor inta aan la qaadin cudurka si loo yareeyo natiijooyinka daran ee ka imanaya COVID-19.

Waa caafimaadkaaga waana go'aankaaga.

Waaxda Caafimaadka ee North Dakota (The North Dakota Department of Health, NDDoH) waxay ka shaqeysaa inay siiso agab waxbarasho iyo qalabyo dad waynaha si shaqsi kastaa uu u qaato go'aamo ku dheehan wax barasho iyo xog ogaalnimo oo ku saabsan tallaalada COVID-19 iyo caafimaadka shaqsiyeed. Talooyinkan cusub ee ku saabsan qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ayaa siinaya xubnaha bulshadeena xoriyada ay ku doortaan inay jecel yihiin inay qaataan qiyaas kale oo tallaalka COVID-19 ah iyo in kale taas oo ku xiran khatarahooda arrimahooda gaarka ah. Dhinacyada ay ka midka yihiin da'da iyo xaaladaha caafimaad ee uu qofka horey usii qabay waxay kordhin karaan fursadaha qofka ee uu ku helaayo jirro daran, isbitaal dhigid iyo dhimasho ay sabab u tahay infekshonka COVID-19. Xubnaha badan ee bulshadeena ka tirsan ee ku haray khatarta sii kordheysa ee COVID-19, helida qiyaasta labaad ee tallaalka xoojiyaha ah ayaa laga yaabaa inuu u bilaabo inuu ka caawiyo inay dareemaan kalsoonida ay u baahan yihiin inay si taxadar leh ugu soo laabtaan noloshii caadiga ahayd.

Halkee ayaan ka heli karaa tallaalkayga labaad ee xoojiyaha?

Macluumaadka ku saabsan bixiyeyaasha tallaalka COVID-19 iyo rugaha caafimaadka ee kuu dhow waxaa laga heli karaa bogga NDDoH ee Tusaha Meelaha Tallaalka COVID. Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa Khadka Tooska ah ee NDDoH 1.866.207.2880 wixii caawinaad ah. Xusuusin ahaan, waxaad heli kartaa tallaallada kale ee sida joogtada ah loogu taliyay (shingles, pneumococcal) isla mar ahaanta aad qaadaneyso tallaalka COVID-19.

NORTH Dakota | Health
Be Legendary.™

YAA HELI KARA TALLAALKA XOOJIYAH AH?

NORTH Dakota | Health
Be Legendary.

TALLAALKA TAXANAHA AASAASIGA AH EE COVID-19	Yaa helaayo hal tallaalka xoojiyaha ah:	Goorma ayeey tahay inaad qaadato tallaalka xoojiyahaaga ah:	Xoojiyahee ayaad heli kartaa:
Pfizer-BioNTech	Qof kasto oo jira 12 sano iyo ka weyn **Yaa heli karo tallaalka labaad ee xoojiyaha ah:** Dadka waaweyn ee jira 50 sano iyo ka weyn	Ugu yaraan 5 bilood ka dib markaad dhamaystirto taxanahaaga tallaalka COVID-19 ee aasaasiga ah Haddii aad xaq u qalanto qaadashada tallaalka xoojiyaha labaad, ugu yaraan 4 bilood ka dib xoojiyehaagii koowaad	• Dadka waaweyn ee da'doodu tahay 18 sano iyo wixii ka weyn waa inay u qaataan tallaalka mRNA COVID-19 (Pfizer BioNTech ama Moderna)xoojiyaha ugu horreeya xaaladaha badankood* • Xoojiyaha labaad waa inuu noqdaa tallaalka mRNA COVID-19 • Dhallinta da'doodu u dhaxayso 12-17 sano waxay heli karaan kaliya tallaalka xoojiyaha COVID-19 ee Pfizer BioNTech
TALLAALKA TAXANAHA AASAASIGA AH EE COVID-19 **Moderna**	**Yaa helaayo hal tallaalka xoojiyaha ah:** Dadka waaweyn ee jira 18 sano iyo ka weyn **Yaa heli karo tallaalka labaad ee xoojiyaha ah:** Dadka waaweyn ee jira 50 sano iyo ka weyn	**Goorma ayeey tahay inaad qaadato tallaalka xoojiyahaaga ah:** Ugu yaraan 5 bilood ka dib markaad dhamaystirto taxanahaaga tallaalka COVID-19 ee aasaasiga ah Haddii aad xaq u qalanto qaadashada tallaalka xoojiyaha labaad, ugu yaraan 4 bilood ka dib xoojiyehaagii koowaad	**Xoojiyahee ayaad heli kartaa:** Tallaalka xoojiyaha koowaad, ee tallaalka mRNA COVID-19 (Pfizer-BioNTech ama Moderno) ayaa la door bidaa inta badan* xaaladaha Tallaalka xoojiyaha ee labaad waa inuu ku jiraa tallaalka mRNA COVID-19
TALLAALKA TAXANAHA AASAASIGA AH EE COVID-19 **Johnson & Johnson**	**Yaa helaayo hal tallaalka xoojiyaha ah:** Dadka waaweyn ee jira 18 sano iyo ka weyn **Yaa heli karo tallaalka labaad ee xoojiyaha ah:** Qof kasta oo ku helay tallaalka J&J/Janssen COVID-19 qiyaastooda aasaasiga ah iyo kan xoojiyahooda ahba Dadka waaweyn ee da'doodu tahay 50 sano iyo ka weyn ee markii ugu horreysay qaatay tallaalka J&J/Janssen COVID-19, iyadoon loo eegin nooca xoojiyaha ay qaateen	**Goorma ayeey tahay inaad qaadato tallaalka xoojiyahaaga ah:** Ugu yaraan 2 bilood ka dib markaad hesho tallaalka J&J/Janssen COVID-19 Haddii aad xaq u qalanto qaadashada tallaalka xoojiyaha labaad, ugu yaraan 4 bilood ka dib xoojiyehaagii koowaad	**Xoojiyahee ayaad heli kartaa:** Tallaalka xoojiyaha koowaad, ee tallaalka mRNA COVID-19 (Pfizer-BioNTech ama Moderna) ayaa la door bidaa inta badan* xaaladaha Xoojiyaha labaad waa inuu noqdaa tallaalka mRNA COVID-19

* Inkastoo tallaalada mRNA loo door biday inuu noqdo xoojiyaha koowaad, J&J/Janssen COVID-19 ayaa laga yaabaa in la tixgeliyo xaaladaha qaarkood.

Xigasho: [Hagitaanada Xoojiyaha ee CDC]

La Cusboonaysiiyay 3/31/2022